



Bulshada PPS ee Qaaliga ah,

Caawa, Guddiga Maamulka ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay indho-dheeraad ah ku eegeen cod bixinta ku aadan furida laba dugsi dhexe lagaga furayo Waqooyi-bari Portland. Tani waxay ka dhigeyso in uu yahay hadal weyn oo ku saabsan ballanqaadkayaga bixinta waxbarasho loo siman yahay iyo adeegyo ku aadan bulshada aan taariikh ahaan sida fiican adeega u helin

Guddigu waxay ansixisay qaraar uga baaqaya Degmada in ay furto Roseway Heights iyo Harriet Tubman iyaga oo noqonaya dugsiyo dhexe. Aniga ahaan, kani waa go'aan la taaban karo oo xambaarsan ballanqaad aan kaliya ahayn in kor loo qaado guul gaaridda ardayda iyo natijjooyinka, laakiin wuxuu sidoo kale wanaajinayaa sida aanu wax u barno ardayda dhigata fasalada dhexe ee Degmada oo dhan. Waan u riyaaqay in Guddigu hore u sii wado wax ahaan jiray dadaal dheer oo adag.

Si loo hubiyo, waxaa jira caqabado dheeraad oo ina horyaala. Ansixinta qaraarka, Guddigu waxay ku baaqday falanqeyn la xiriirta caafimaadka iyo ammaanka guud ee Harriet Tubman, ay qayb ka ahaato sababtoo ah walwalka bulshada ee ku saabsan tayada hawada. Waanu bilaabi doonaa taasi, laakiin waxaa laga yaabaa in ay qaadato dhownr toddobaad ama xataa bilo. Iyada oo taasi og, Guddigu waxay ansixisay qorshe mustaqbalka la xiriira oo loogu talagalay in ay Degmadu bilowdo meel bedel ah oo loogu talagalay dugsiga dhexe ka raadiso xaafadda Albina. Wuxaan dhammaan daneeyayaasha ka codsan doonaa in ay nugu soo biiraan dadaalkaasi la sameysanayo.

Guddigu waxay sidoo kale hakisay wixii isbeddelka xuduuda ku saabsan ee la xiriira dugsiyada dhexe ee cusub, iyada oo codsatay daraasad dheeraad ah oo ku saabsan "fikradaha aan la shaacin" ee loo isticmaalay xuduudaha la soo jeediyay. Shaqaalaheenu waxay sii wadi doonaan in ay ka shaqeeyaan kuwani sida aan ugu dadaalno in aan mashaariicdan hore u wadno.

Intii karaankayaga ah waxaan isku dayi doonaa in aynaan kaliya kula soo socodsiin balse kugu martiqaadno in aad ka soo qayb gasho. Inaga oo wadajirna, waxaanu bixin doonaa waxbarashada loo siman yahay isla markaana heerka sare ah oo ardaydeenu u qalmaan.

Guadalupe Guerrero, Kormeeraha Guud